

Xogta Kooban ee Bogga Caawimaada Dhaqaalaha

Fadlan noosoo sheeg kahor booqashadaada haddii aadan haysan caymis caafimaad ama aadan dhiibi karin qarashka adeegyada ama daawooyinka. La taliyaasheena dhaqaalaha ee tababaran ayaa ka shaqayn doona inay kaa caawiyaan helitaanka taageero dhaqaale. Kaliya wac 614-293-0860 laga bilaabo 9 subaxnimo iyo 4 galabnimo maalmaha shaqada.

Haddii aadan haysan caymis ama aadan haysan caymis kugu filan, halkaan ayaad ka helaysaa ilaha caawimaada qaarkood:

- Medicaid wuxuu caymis caafimaad siiyaa malaayiin Ameerikaan ah. Fadlan booqo [bogga](#) Medicaid si aad u aragto inaad u qalanto, ama aad u codsato, booqo.
- Haddii aad lumiso caymiskii aad shaqadaada ku heli jirtay, [COBRA](#) ayaa ku siinaysa caymis aad adeegaaga kusii wadato.
- Barta [Affordable Care Act Marketplace](#), waxaad daalacan kartaa, isku fiirin kartaa aadna ka iibsan kartaa caymis caafimaad.
- Si laguugu qiimeeyo barnaamijyada caawimaada dhaqaalaha oo dheeraad ah oo lagu baxsho Ohio State Wexner Medical Center (Xarunta Caafimaadka ee Wexner ee Gobolka Ohio), wac Billing Customer Services (Adeegga **Biilasha Macamiisha**) ood ka wacayso 614-293-2100.

Ilaha Kale:

- Kala xariir la taliyaasheena dhaqaalaha nambarka 614-293-0860.
- Liiska qiimaha iyo qiyaasaadka qarashka adeegyada ayaa laga helayaa [boggeena](#).
- MyChart ayaa kuu sahlaysa inaad si amaan ah u adeegsato kumbuyuutarkaaga ama moobilka si aad u maarayso una hesho xog ku saabsan caafimaadkaaga, u gasho qaybo kamid ah diiwaannadaada caafimaadka, u akhrido biilaashada aadna u samaysato qorshayaal lacag bixin. Si aad isku diiwaan-gelid, booqo mychart.osu.edu.